

## Waa doorashadaada

Codkaaga wax wayn ayuu tarayaa. Demoqraadiyadda waxey ku saleysan tahay go'aanka bulshada. Waxaad qaadaneysaa mas'uuliyadda bulshada iyo baniaadamka kale marka aad isticmaashid xaqaada cod bixinta.

Marka aad doorashadu codeysid, ayaa ah marka aad aad qeyb qaadaneysid doorashada madaxda siyaasadeed. Islamarkaana aad saameyn ku yeelaneysid noolashaadu. Soo xaadir maalinta doorashada codkaaduna sax. Codkaaga ayaa isbadal sameyn karo!

### YAA CODEYN KARO?

#### ***Doorashooyinka gobolada iyo kuwa deegaanka:***

Waxaad ka codeyn kartaa doorashooyinka deegaanada iyo kuwa gobolka, haddii 18 sano jir aad tahay, aadna si joogta ah uugu nooshahay deegaankaaga/gobolka islamarkaana aad tahay:

- wadani Denmark ah ama
- aad tahay wadani u dhashay wadan ka mida ah Midowga Yurub (EU, Iceland ama Norway, ama
- uu yahay muwaadin u dhashay Boqortooyada Ingiriiska oo taariikhda 31 Janaayo 2020 lahaa oo ilaa iyo markaa ka dibna lahaa degaansho isku xiriirsan oo Denmark ah; ama
- aad tahay qof u dhashay wadan kale oon Midowga Yurub ka tirsaneen, Norway ama Iceland laakiin ku noolaa Denmark uugu yaraan 4 sano doorashadaan ka hor.

#### ***Doorashooyinka baarlamaanka iyo aftiyada:***

Waad ka codeyn kartaa doorashooyinka baarlamaanka iyo aftiyada haddii aad tahay qof u dhashay wadanka Denmark, aad tahay 18 sano jir ama ka weyn tahay aadna tahay qof si joogta ah u degan boqortooyada. Sidoo kale waa in aan laguugu dhawaaqin inaad tahay qof aan u qalmin (degaansho) (sida wwafaqsan xerka deganaashaha).

*Doorashooyinka Yurub:*

Waad codeyn kartaa Denmark doorashooyinka Baarlamaanka Yurub haddii aad tahay 18 sano jir ama aad tahay mid ka mida:

- uu yahay muwaadin Deenish ah oo degenaansho rasmi ah ku leh Boqortooyada ama si rasmi ah ugu nool wadan kale oo EU da ah,
- uu yahay muwaadin u dhashay wadan Midowga Yurub ka mid ah oo si rasmi ah Denmark ugu nool, ama
- uu yahay muwaadin u dhashay Boqortooyada Ingiriiska oo taariikhda 31 Janaayo 2020 lahaa oo ilaa iyo markaa ka dibna lahaa degenaansho rasmi ah oo Danmark ah.

**SIDAAN AYAAD U CODEYNEYSAA**

Qof walba oo xaq u leh inuu codeeyo, waxaa boostada loogu soo dirayaa karaka codeynta. Kaarka waxaa ku qoran meesha iyo maalinta aad codeyneysid. Goobta cod bixinta, waxaa joogo saraakiisha doorashada. Waxey hubinayaan wax walboo la xiriiro doorashada in si sax ah loo sameeyo. Waad weydiin kartaa sarkaalka kormeero doorashada ama saraakiisha kale haddii aadan hubin qaabka loo codeeyo. Goobta codeynta, aad miiska cod bixinta adoo sita kaarkaaga. Haddii xarunta laga isticmaalo liiska digitaalka ah, waad xulan kartaa miiska aad rabtid inaad ka codeysid.

Dhiib kaarkaaga, sarkaal ka mida kuwa doorashada ayaa ku dhii-baayo cod ey ku qoran yihiin liiska xisbiyada iyo musharixiinta. Waxaa lagu weydiinayaa taariikhdaada dhalashada si loo hubiyo inaad tahay qofka karaka cod bixinta leh.

U qaado xaanshada codka kaalinta codeynta oo kaligaa aad joogeysid. Saar calaamadda (X) adoo isticmaalaaya qalinka qori ama qalin caadi ah (hal istilaab (x) oo kaliya saar) sanduuqa yar oo la saxaayo oo ku hor qoran xisbiga ama musharaxa aad dooneysid inaad u codeyso. Haddii khalad uu kaaga dhaco xaanshada codka, waad badalan kartaa qardaasta adoo mid kale ka qaadaanaayo saraakiisha doorashada, laakiin oo kali haddii aadan weli gelinin codkaaga sanduuqa. Haddii ey kuugu adkaato akhrinta af

Daanishka, sarkaal ka mida ah kuwa dooraashada ayaa ku caawin karo adoo joogo goobta cod bixintu. Marka aad dhameysid, ka bax goobta codeynta ka dibna geli codkaaga sanduuqa codadka.

**XUSUUSNOOW:** Waxaad sidoo kale ku codeyn kartaa boostada adoo joogo degaan walboo maxali ah oo wadanka gudahiisa maalinta doorashada ka hor. Deegaanada maxaliga waxaad sidoo kale ka codeyn kartaa xarumaha adeegyada bulshada. Deegaanada qaarna waxaad ka codeyn kartaa maktabdaha, xarumaha waxbarashada iyo xarumaha codeynta ee la wareejiyo. Weydii maamulka deegaanka meesha aad uuga codeyn karto adoo isticmaalaayo boostada ama booqo wwebsaytka maamulka deegaanka.

